Somali

# Tusaha Wakiilada Ammaanka & Caafimaadka ee Sharciga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada ee 2004

**Ogow xuquuqdaada**
**Dooro Wakiilkaaga Ammaanka iyo Caafimaadka**
**Ururada shaqaalaha ee Mihnada Hilibka ee Australasian ayaa ku caawin doonta.**

**Introduction by**
**Graham Bird**



**Secretary**
**AMIEU**

**Loo shaqeeyahaagu WAA INUU ku siiyaa oo ilaaliyaa nidaam shaqo iyo goob shaqo oo ammaan iyo caafimaadba leh.** Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin nidaam shaqo iyo goob shaqo halkaas oo dhammaan khatarta ammaanka iyo caafimaadkaba la kontorooley. Waa loo shaqeeyahaaga qofka leh masuuliyada ugu weyn ee caafimaadkaaga, ammaankaaga iyo samafalkaaga markaad shaqeynaysid.

shaqada hilibka laga shaqeeyo, iyo goobaha shaqo ee la xiriira, had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo jir ahaan adag, khatar ah oo xirfad badan. Xoogga shaqo habeysan la'aanteed, AMIEU, waxaan shaki ku jiran inay khatarteedu sii badaneyso.

**Waa in la doortaa Wakiilka Ammaanka iyo Caafimaadka si uu kuu metelo**
Wakiilada ammaanka iyo caafimaadku waxay leeyihiin tiro awood/xuquuq ah si ay wax uga geystaan ammaanka iyo caafimaadka shaqaalaha. Buuggan yarka ahi waxaa bixiyey AMIEU si uu kaaga caawiyo inaad hesho HSRs iyo si uu u caafiyo HSRs inay fahmaan sharciga.

**Goobaha shaqada ee leh Wakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka shaqaalaha way ka caafimaad iyo ammaan badan yihiin goobaha shaqada ee aan lahayn HSR.** Tani ma aha wax lala yaabo maadaama wakiilada shaqaaluhu ay u yaqaanaan goobta shaqada si ka wanaagsan maamulka oo ay ka warqabaan waxa run ahaantii ka socda. Waxay sidoo kale metelaan marinkii ahaan ay shaqaaluhu u sheegan lahaayeen waxay saluugsan yihiin iyo in wax laga qabto. Waxaa jira tiro daraasado ah oo aduunka laga sameeyey sidana sheegaysa.

**Goobaha shaqada ee habeysan waa goobo shaqo oo ka ammaansan.**
Sheyga ugu muhiimsan ee loo adeegsado uguna waxku oolsan habeynta wakiilada ammaanka iyo caafimaadka oo wanaagsani waa ururka. Waxaa jiro siyaalo badan oo uu Ururku isbedel ka muujiyo wakiilada ammaanka iyo caafimaadka.

AMIEU waxay bixisaa tababarka wakiilada ammaanka iyo caafimaadka ; waxay ka caawisaa garashada khatarta, qiimeynta khatarta iyo kontoroolka;

waxay bixiyaan macluumaad kabitaan ah oo ku saabsan khataraha iyo kontoroolka; waxay caawiyaan HSR xagga wada hadalka markii loo baahdo; waxay ka dhigaan shaqaalaha kuwo aad isugu kalsoon; waxayna sameeyaan inay horumariyaan inay ka sameeyaan ururka dhexdiisa dhaqan ammaan oo fiican. Ururku wuxuu wixii horumar ah wuxuu kula socdaa isagoo sameynayo cilmi baaris iyo shuruuc waxayna hubiyaan in la wargeliyo HSRs.

Tobbonaan sannadood AMIEU waxay lahayd shaqaale Ammaan iyo Caafimaad si ay u caawiyaan xubnaha.

**Ururada shaqaalaha badanaa waxay gartaan khataraha wax badan ka hor maamulka.** Khataro badan ayaa markii ugu horeysay waxaa ogaaday ururada, marmarka qaarkood ka dib markii uu maamulku isilowsiiyey ama uu qariyey digniinaha hore loo siiyey. AMIEU waxay u dagaalan tahay in shaqaaluhu ka qaadi karaan cuduro xayawaanka (zoonoses), dhakhaatiirtu si ay u aqoonsadaan cudurada oo ay daaweeyaan, iyo sidoo kale nidaamyada magdhowga si loogu aqoonsado iyaga wax la xiriira shaqada. Waxaan weli u dagaalameynaa ka hortaga zoonoses.

Waxay ahayd ururada sheegay khataraha asbestos oo u ololeeyey mamnuucida sannado fara badan ka hor intaysan dawladu soo saarin mid. Ururada sidoo kale waxay soo saareen khatarta ay leeyihiin tiro kiimikooyin khatar ah. Ururada waxay ahaayeen kuwii ugu horeeyey ee soo jeediya waxyaalo badan oo ay saluugsan yihiin oo leh dhaawacyo soo noqnoqda, u xoog sheegashada goobta shaqada, iyo saameynta saacadaha dheer ee shaqo. Markii ururada wakhtigii ugu horeeyey ay sheegeen khatarahan badidooda, loo shaqeeyayaasha iyo warbaahinta waxay ku murmeen inay tahay waxaan waxba ka jirin. Ururada shaqaalaha ayaa saxsanaa.

**WorkSafe waxay caawisay wakiilada ammaanka iyo caafimaadka iyadoo maalgelinaysa Sarkaalka Taageerada ee AMIEU** ilaa iyo Nofeembar 2004. AMIEU waxay dalbatay maalgelin si ay u yeelato Sarkaal Taageero mustaqbalka iyo si ay u horumariso siyaalo cusub ee wakiilada caafimaadka iyo ammaanka oo midba midka kale ku taageerayo netwaaga.

Shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin inay guriga yimaadaan iyagoo shaqo ka yimid iyagoo u caafimaad iyo ammaan qaba sidii markii ay shaqada aadeen. Goobaha shaqada ee ay habeeyeen ururadu waa goobo shaqo oo ammaan leh.

**Ogow xuquuqdaada**
**Dooro Wakiilkaaga Ammaanka iyo Caafimaadka**
**Ururada shaqaalaha ee Mihnada Hilibka ee Australasian ayaa ku caawin doonta.**

# Tusaha Wakiilada Ammaanka & Caafimaadka ee Sharciga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada ee 2004

buuggan yar waxaa loogu talagalay inuu ka caawiyo Wakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka inay fahmaan qaar ka mid ah xuquuqda iyo waajibaadka marka loo eego Sharciga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada. Waxaa saameeya khibrada HSRs ee Mihnada Hilibka.

Qaar ka mid ah xarfaha la soo gaabiyey ee loo isticmaalay buuggan yar waxaa sidaan soo socota:

- Act – Waa Sharciga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada 2004 ee Fiktooriya
- ARREO – Wakiilada Idman ee Urarka Shaqaalaha Diiwaangashan
- OHS – Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada
- HSR – Wakiilka Ammaanka iyo Caafimaadka
- DWG – Kooxda Shaqo Loogu talagalay
- PIN – Bixinta Ogeysiiska  Hagaajinta (Provisional Improvement Notice)
- RTW – Qorshaha Shaqo dib ugu Noqoshada
- Union – ururka Shaqaalaha Mihnada Hilibka ee Australasian

**heerarka iyo ujeedooyinka ammaanka iyo caafimaadka**

Ujeedada Sharciga waxaa lagu sharxay qaybta 2(1) sidii:

- In la nabadgeliyo caafimaadka, ammaanka  iyo samafalka shaqaalaha iyo dadka kale ee shaqada jooga, iyo
- Loo baabiin lahaa ilaha khataraha caafimaadka, ammaanka ama samafalka shaqaalaha; iyo
- In la hubiyo in caafimaadka iyo ammaanka xubnaha dadweynaha aan lagu gelin khatar sida loo shaqeeyayaashu hawshooda u fuliyaan; iyo
- loo bixin lahaa ku lugyeelashada shaqaalaha, loo shaqeeyayaasha iyo ururada matelaya dadkaas qaabeynta iyo dhaqangelinta caafimaadka, ammaanka iyo heerarka samafalka.

Maamulka Shirciga waa inuu la shaqeynayaa xeerarka caafimaadka iyo ilaalinta ammaanka sida lagu sharxay qaybta 4aad. Taas oo ah:

- Shaqaalaha, dadka kale shaqeeya iyo dadweynaha waa in laga siiyaa ilaalinta ugu sareeysa khatarta iyo
- Dadka kontoroola ama maamula goobaha shaqada ama socodka shaqo waa inay tirtiraan/yareeyaan khataraha iyo
- Loo shaqeeyayaashu waa inay noqdaan kuwo horkaca si ay u hubiyaan caafimaadka iyo ammaanka ( haddii aan si kale u dhaho tirtiraan khataraha ka hor intaan qof ku dhaawacmin);
- isgaarsiinta, macluumaad isdhaafsiga iyo fikradaha ku saabsan khataraha iyo kontoroolada waa lagama maarmaan; iyo
- Shaqaalaha waa in lagu dhiirigeliyaa in la metelo caafimaadka iyo ammaanka waxaan uga jeedaa waa inay lahaadaan wWakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka.

Tan waxaa lagu sii sharxay qaybta 20aad ee Sharciga oo sharxaya tirtirada khataraha caafimaadka caafimaadka iyo ammaanka ama yareynta khatarta ilaa inta macquul ahaan suurta galka ah. Waxay sidoo kale ka dhigeysaa caddaan waxaa loola jeedo ' macquul ahaan suurtogal ah".

Qaybahan aasaas ahaan micnahoodu waxaa weeye in shaqaaluhu ay xaq u leeyihiin shaqo leh ammaan oo aan wax khatar ah u lahayn caafimaadka. Waxay sidoo kale micnaheedu yahay in shaqaalaha ay xaq u leeyihiin inuu metelo Wakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka iyo Ururka shaqaalaha.

**Sidee baan ku helnaa inay na metelaan HSRs?**

Doorka Wakiilka Ammaanka iyo Caafimaadka waxaa weeye inay ka metelaan xubnaha Kooxdooda Shaqo ee Loogu talagalay dhammaan arimaha ammaanka iyo caafimaadka.

Si sahal ah uga dhig inay, DWG tahay dad doorta HSR. Waxaa si faahfaahsan loogaga hadlayaa Qaybta 7 ee sharciga. Haddii ay shaqaaluhu doonayaan inay yeeshaan HSRs (ama ay bedelaan tirada HSRs) waa wakhtigii ay u tegi lahaayeen maamulka oo ay furan lahaayeen wada hadal/ka xaajood ku saabsan DWGs. Maamulmulku waa inuu kaala hadlaa wax ku saabsan DWGs iyagu ma go'aansan karaan inta HSRs ee jiraya. Shaqaaluhu waxay awoodaan inay idmaan wakiil wax qabta isagoo iyaga metelaya wada xaajoodkan [Qaybta 44(5)].

*Maamulaha Meesha (Shop Steward), Qabanqaabiyaha Ururuka shaqaalaha ama Sarkaalka Taageerada Shaqaalaha ama Sarkaalka Taageerada HSR ayaa kala xaajoon kara isagoo metelaya shaqaalaha.*

Kooxeysi noocee ah ayaa hubin kara in shaqaalaha si fiican loogu metelay ammaanka iyo caafimaadkooda? Go'aansiga in HSRs ee loo baahan yahay, iyadoo raacsan qaybta sharciga ee 46 waa inaad tixgelisaa:

- Intee shaqaale ah baa halkaas jooga?
- Dhammaanteen ma waxaan sameynaa isku shaqo?
- Dhammaantiin isku khatar miyaa idin heysa?
- Intee shaqaale ah baa halkaas jooga oo isku shaqo sameynaya?
- Xaggee baad dhammaantiin jootaan sidee baadna iskugu tegi kartaan idinku midba midka kale?
- Dhammaantiin ma waxaad shaqeysaan isku wakhti mise xilliyo kala duwan?
- Dhammaantiin ma waxaad ku hadashaan isku luuqado?

Arinta kale ee la doonayo in la tixgeliyo waa imisa HSRs iyo ku xigeeno HSRs ayaad u baahan tihiin DWG kasta . Waxaa loo baahan yahay inay jiraan ugu yaraan hal HSR,DWG kasta. Ku xigeen HSRs wuxuu bedelayaa HSR markaynan halkaas joogin si ay u qabtaan xuquuqdooda tusaale, marka HSR uu fasax ku maqan yahay.

**Tusaale 1**

tusaale mid ka mid ah Meelaha xoolaha lagu qalo wuxuu lahaa bilow ahaan 1 HSR oo loogu talagalay dhammaan xoogsada. Shaqaaluhu waxay doonayeen inay helaan wHSRs badan si uu u jiro dabaq kasta oo wax lagu qalo hal HSRs, hal mid kasta oo ka mid ah qolalka lafa bixinta , mid meesha laga raro hilibka. Shaqaaluhu waxay sidoo kale doonayeen inay yeeshaan Kuxigeen ah HSRs ka dib markii uu yimid sharciga 2004.

Waftiga Shaqada waxay la soo qaadeen arintan Maamulka wadahadal ka dib laakiinse isla markiiba lama gudagelin arintana waxay gashay mala awaal xitaa inkastoo wada xaajoodka waxay ahayd inay ka bilaabanto 14 maalmood gudahood [qaybta 43(3)].

ka dib markay qabanqaabiyayaashu ay u yeereen shaqaalaha, wada xaajood ayaa bilowday. Bilow ahaan maamulku waxay dareemeen in shaqaalaha soo jeediyeen HSRs fara badan goobtooda shaqada xitaa inkastoo ay jireen 100 shaqaale wax ka badan. Qabqaabiyayaashu waxay caawimaad weydiisteen Sarkaalka Taageerada HSR oo u tilmaamey siday soojeedintani ay uga shaqeynayso ammaanka iyo caafimaadka goobta shaqada. Sarkaalka Taageeradu wuxuu sidoo kale tilmaamey in haddii aan heshiis la gaarin, inay suurtogal noqon karto in la keeno Dawlada si uu kormeere u go'aamiyo arintan [qaybta 45(1)]. wadahadal ka dib iyo wakhti lagu texgelinayo arintan, heshiis ayey gaareen u dhaxeeya maamulka iyo wakiilada shaqaalaha.

Wada xaajoodka ka dib u dhaxeeya maamulka iyo shaqaalaha wuxuu dhaliyey heshiiska shaqaalaha DWGs , shaqaaluhu wuxuu ka bixiyey ogeysiin qoraal ah arintan. Taasina waxay raacsaneyd qabyta sharciga ee 44(2).

shaqaaluhu waxay weydiiyeen Sarkaalka HSR inuu soo qabanqaabiyo doorashooyinka [qaybta 54(4)] sababtoo ah qaar ayaa ka welwelsanaa in maamulku uu magacaabi doono wakiilka. Wuxuu tilmaamey Sarkaalka Taageeradu in maamulku uusan go'aamin kareynin cidda noqoneysa wakiilka shaqaalaha iyo waxaana laga dalbay soo magacaabid DWGs kasta, waxaa la tilmaamey in xubin kastaa oo ka tirsan DWG ay xaq u leedahay inay u istaagto doorasho. Sababtoo ah tirada musharixiinta ee doorashada HSR iyo Kuxigeenada HSR ee DWGs kasta wuxuu la mid ah tirada in boos ee bannaaneyd looma baahneyn in la sameeyo wax doorashooyin ah [qaybta 54(6)].

waxaa lagu heshiiyey in HSRs ay xafiiska heyn doonaan 3 sanno oo xiliga ugu yar ee xafiiska la heynayo iyadoo loo eegayo qaybta sharciga ee 55(1). dib ayaa loo dooran karaa.

**Tallo siin loogu talagalay HSRs**

meeshii ay jiraan tiro wakiilo ah, waa lagama maarmaan inay isla xiriiraan oo ay si wada jir ah u metelaan shaqaalaha goobta jooga. Si ay tan u sameeyaan waa inuu jiraa isgaarsiin wanaagsan.

Tan waxaa la gaari doonaa la kulanka xubnaha si ay ugu lugyeeshaan arimaha iyo in dib warbixinta loogu soo celiyo , iyadoo la qabanayo kulamo wadajir ah wakiilada kale ee ammaanka iyo caafimaadka, iyadoo la soo saarayo wargeyska OH&S ee goobta shaqada iyo xiriirinta gudiyada ururada shaqaalaha ee goobta.

Hal sheeko khiyaali ah oo ay kor u qaadan maamulmu waxaa weeye inuusan qofka shaqaalaha ahi qaban karin booska ah HSR marka isaga ama iyadu ay yihiin qof shaqo dalbanaya. Tani run ma aha. Faa'iidooyin ayey leedahay in isla qofkii loo magacaabo labada boosba – waxa cadi waa inay tahay waxaan suurtogal ahayn inay noqdaan HSR iyo qof shaqaale ah iyadoo ay tahay isla qofkii.

Meesha ay guud ahaan HSRsay isticmaali karaan awoodooda oo keliya marka loo eego waxyaalaha saameeya xubnahooda DWG, haddii ay jirto khatar degdeg ah oo caafimaad iyo ammaan oo saameynaysa xubin kale oo ah DWG ama haddii xubnaha DWG kale ay caawimaad soo weydiistaan, wax muuqda ma aha in arinta loo gudbiyo HSR kooda, waxbaad qaban kartaa adoo metelaya iyaga. Taas waxaa lagu sharxay qaybta sharciga ee 59(a) & (b).

**Tusaale 2**

Tusaale tan oo kale ahi wuxuu ka dhacay meesha hilibka lagu qalo halkaas oo uusan jirin Kuxigeenka HSRs maruu HSR -kii layn yar uu maqnaa jiro awgeed. Markaas oo bakhtiga 4 ari ahi ay ka soo dhaceen birta subax shaqaaluhu waxay weydiiyeen HSR laynka hilib lo'aadka inuu u yimaado oo uu baadho waxaan khaldan. Wakhtigaas wax shaki ahi kuma jirin in HSR ka laynta hilib lo'aadka uu awoodey inuu u soo gudbo laynka yar, uu baaro oo uu la xaajoodo horjoogaha. Markii la ogaaday inaysan yirin dayactir ku filan inuusan jirin waxaa laysku raacay in laynka la joojiyo inta dayactir degdeg ah laga sameynayo.

**Yaa masuul ka ah ammaanka iyo caafimaadka goobta shaqada?**

Loo shaqeeyaha ayaa ka masuul ah. Waa inay ilaa hadda ilaa intii macquul ah ee la sameyn karo ay qabtaan oo dayactiraan jewiga shaqo oo ammaan ah oo aan wax khatar ah u lahayn caafimaadka. Caafimaadka waxaa ka mid ah waxyaalaha caddaanka ah sida cudurada (zoonoses oo ah cudurada laga qaadi karo xoolaha ee ay qaadi karaan shaqaalaha hilibka ka shaqeeya) laakiinse waxaa sidoo kale lagu sharxay qeexinta caafimaadka taas waxaa ka mid ah caafimaadka cilmi nafsiyeed. Masuuliyada loo shaqeeyaha waxaa lagu sharxay Qaybta 2aad ee Sharciga.

Qaybta 21 ayaa sharxeysa masuuliyada la xiriirta jawiga shaqo, wershadeed, waxyaalaha iyo nidaamka shaqada. Waxaa sidoo kale cad in loo shaqeeyaha laga doonayo inuu bixiyo tasiilaadka samafalka shaqaalaha oo ay ka mid yihiin tasiilaadka sida musqusha, qubeyska, qolalka bedelashada , sanduuqyada alaabada la gashado, tasiilaadka qadada. Qaybta 21 ayaa sidoo kale sheegaysa in loo shaqeeyayaashu laga rabo inay bixiyaan

macluumaadka, awaamiirta, tababarka iyo horjoogaha ee lagama maarmaanka u ah shaqaalahooda si ay u qabtaan shaqada si ammaan ah oo khatar ku ahayn caafimaadka.

Sidoo kale waxaa lagu caddeeyey qaybta 21(3) in masuuliyadaan loo shaqeeyaha ay gaareyso ilaalinta qandaraaslayaasha madaxa bannaan iyo shaqaalaha qandaraaslayaasha.

**Kuwa kale ee masuuliyada leh**

dadka kale ee masuuliyada leh caafimaadka iyo ammaanka ayaa ah kuwa habeeya dhismayaasha (qaybta 28) iyo wershada (qaybta 27). kuwa sameeya wershada ama waxyaalaha kale (qaybta 29) iyo kuwa keena wershada iyo waxyaalaha kale (qaybta 30) sidoo kale waxay leeyihiin masuuliyado khaas ah oo caafimaad iyo ammaan.

Inkastoo loo shaqeeyayaashu, naqshad sameeyayaasha iyo wershadeeyayaasha ay leeyihiin masuuliyada inteeda ugu badan ee caadimaadka iyo ammaanka, waxaa jira qaar ka mid ah masuuliyada oo ay leeyihiin dhammaan shaqaaluhu. Qaybta 25 waxay ka hadashaa waajiyaadka shaqaalaha. Soo koobid ahaan waxay leedahay waa inaad qaadaa taxadar macquul ah caafimaadka iyo ammaanka nafsadaada iyo kuwa kale ee kuu dhow. Waa maxay " taxadarka macquulka ah" waxay ku xiran tahay taxadarka aad awoodo inaad sameyso.

Tusaalaha nashaadka wax qabad ee aan la aqbali doonin waa meesha ay gowracayaashu ka masuulka ahaa inay isku quursadaan oo ku isliidaan wax yar. Iyadoo waxqabadkani uu ahaan doono ciyaar khatar gelinaysa dadka ay way wadashaqeeyaan sababtoo ah bakteeriyada zoonotic ayaa laga yaabaa inay ku jirto caanaha ( iyo dareeraha kale jirka) oo u keeni karta jiro shaqaalaha .

Haddii la caddeeyo in xoolo gowracayaasha lagu tababaray wax ku saabsan khatarta cudurada zoonotic oo ay ogaayeen khatarta caanaha, waxay noqon kartaa in la tuso in shaqaalaha is liidaya inaysan kuwa kale qaadanin:

- taxadar macquul ah ammaanka iyo caafimaadka dadka kale ee laga yaabo inay saameyn ku yeelato falalka shaqaalaha ama waxyaalaha laga tegayo sameyntooda ee goobta shaqada.

Waxaa lagu sharxay qaybta 25(3) in ka hor shaqaalaha lagu ciqaabi karey inaysan qaadin taxadar macquul ah waa inay go'aamisaa " iyadoo la tixgelinayo waxa shaqaaluhu ka ogaa waxyaalaha ku saabsan xaaladaha khuseeya".

Si cad haddii xoola gowracayaashu aan la soo barin zoonoses iyo khatarta la xiriirta inay kaagaaraan caano aan un[asteurised maqaarka, loo shaqeeyalaha ayaa laga yaabey in masuuliyadeeda lagu qaado ah inuusan ku siin:

> macluumaadkan, awaamiirtan, tababarka ama horjoogida shaqaalaha waxay muhiim u tahay si ay u awood siiso dadkaas inay shaqadooda qabsadaan si ammaan ah oo aan kharar gelineynin caafimaadkooda" [qaybta 21(2)(e)].

iyadoo sidoo kale qaadida taxadar macquul ah, shaqaalaha loogama baahna inay burburiyaan ama si khalad ah u isticmaalaan wax allaale wixii shirkadu u siiso caafimaad iyo ammaan, qaybta 25(2).

HSRs waa inay ogaadaan inaysan masuul ka ahayn ammaanka iyo caafimaadka shaqaalaha sababtoo ah waa la doortay. Tan waxaa lagu sharxay qaybta 58(3) sida:

- waxba sharcigan ah ama shuruucdu kuma soo rogeyso, ama in loo qaato ma aha in lagu soo rogayo, hawl ama waajib caafimaad iyo ammaan ka wakiilka ilaa heerkaas.

*Doorka HSR waxaa weeye inuu metelo shaqaalaha DWG -gaaga, ma aha inuu metelo maamulka.*

**Tusaale 3**

isla markii hilib duubaha loogu doortay HSR ahaan qolka hilibka tafaariiqda ah waxaa loo sheegay wakiilka oo uu u sheegay maareeyaha bakhaarku inay ahayd waajibkeeda inay hubiso in hiliblayaashu ay xiran yihiin gacmo gashigooda markay wax jarayaan. Waxaa lagu soo jeediyey warbixinta HSR in hiliblihii aan xirneyn gacmo gashiga maareeyaha bakhaarka si uu u marsiiyo tallaabo anshax ka qaadis ah. Inay boolis ka noqdaan ma aha waajibka wakiilada ammaanka iyo caafimaadka.

**Ciqaabaha**

Sharcigu ciqaabta ah inaadan aqbalin masuuliyada ammaanka iyo caafimaadka wuu la caddeeyey. Waana mid weyn. Qaybo badan oo ka mid ah sharciga waxaa jirta ciqaabta ugu badan oo lagu sharxay tusaale haddii loo shaqeeyuhu uusan raacin qaybta 21 ciqaabtu waa 1800 oo unug oo ciqaab ah shakhsigii, 9000 unug oo ciqaab ah wershada ganacsiga. Ganaaxyo suurto gal ah ayaa badanaa loo gudbiyaa " unugyada ciqaabta" meeshii aad ka hesho Sharciga dhexdiisa tiradu waa ciqaabta ugu badan. Wakhtiga la qoray ( 2007) 1 unug ee ciqaab ahi = $107.43 taas micnaheedu yahay 9000 ee ah unugyo ciqaabeed = $966,870.00

waxaa weheliya inta ugu badan ee ah jebinta sharciga waxaa jira haddal khaas ah (qaybta 32) oo ku saabsan "Waajibaadka ah inaadan si taxadar la'aan ah aadan u khatar gelin dadka goobta shaqada jooga" oo leh ciqaabta ugu sareysa dhammaan sharci jebinta marka loo eego oo ay ku jirto ilaa 5 sanno oo xarig ah.

Markii lagu daray tahay Sharciga intii la isticmaali lahaa sharciyada ku Dilida qof si aan ula kac ahayn goobaha shaqada. Waa in la ogaadaa in taxadarka

ka horeeyaa oo kaliya inuu yahay “ si aan ka taxadar lahayn khatar u gelinta” ilaa hadda (Ogoosto 2007) waxay ahayd shaqaalaha.

**Xuquuqda HSRs**

sida lagu sheegay qaybta sare 58(3) waxay leedahay in HSRs inaysan lahayn wax waajibaad ah. Si kastaba ha ahaatee HSRs xuquuq ayey leeyihiin. Qaadashada doorkan waxaad leedahay tiro xuquuqo ah oo hoos imaneysa Sharciga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada ee 2004:

- si lagaala tashado garashada khatarta, qiimeynta khatarta iyo go'aamada xaddidaadaha iyo isbedelkasta oo goobta shaqada ah oo laga yaabo inay saameyn ku yeelanayaan caafimaadka, ammaanka ama samafalka , sida keenida qalab cusub ama walax, wax ka bedelid kasta , isbedelka sida hawsha loo qabto ama shaqeynta, isbedelada xilliyada shaqada ama habeynta gelinka shaqada – qaybaha 35 iyo 36;
- si laguu siiyo macluumaad ku saabsan ammaanka iyo caafimaadka, sida khataraha, dhaawacyada, baaritaanada ama warbixinada la taliyayaasha – qaybta 69(1)(a)
- si aad u yeelato wakhti lacag lagu siinayo oo aad si firfircoon ugu lug yeelato arimaha ammaanka iyo caafimaadka sida kormeerka, baaritaanka, kulamada guddiga OH&S, la hadlida xubnaha, la kulmida wakiilada kale ee ammaanka iyo caafimaadka – qaybta 69(1)(d);
- inaad tagto tababarka loogu talagalay HSRs – qaybta 67;
- in lagu siiyo tasiilaadka, sida helida photocopier, fakis mishiin, taleefan, armaajo wax lagu rido, kumbiyuutar, iimeyl/interneet – 69(1)(e);
- inaad bixiso Ogeysiiska Bixinta Hagaajinta si loo khasbo tallaabo ka qaadida in laga qaado khatar markaadan awoodin ku xalinta arin wada xaajoodka maareeyahaaga – qaybaha 60, 61 & 62;
- inaad bixiso Shaqo Joojin oo ah arin kasta oo aad rumeysan tahay inay ku tahay khatar ku soo foodleh ammaanka iyo caafimaadka xubin kasta – qaybta 74;
- inaad ka hesho tallo iyo caawimaad dadka kale, sida HSRs kale, wafdiyada, Qabanqaabiyaasha, Saraakiisha Ammaanka iyo Caafimaadka ee Ururka shaqaalaha iyo Kormeeraha VWA ama Sarkaalka Goobta- qaybtaha 58(1)(f) & 70.

**La tashiga**

Sharciga waxaa ku jira Qaybta 4 oo sharxeysa waajibaadka loo shaqeeyayaasha ee ah inay la tashadaan shaqaalaha iyo HSRs. Waa in la ogaadaa in inkastoo qaybta 35(1) ay leedahay waa in “loo shaqeeyuhu waa inuu ilaa hadda intii macquul ahaan suurtogal ah la tashadaa” hadalka ah “macquul ahaan suurtogal ah” oo leh qeexideeda caadiga ah ee qaamuuska oo micnaheedu yahay mid muuqata oo la sameyn karo”.

Haddii shaqaalaha ay metelayaan wakiilada ammaanka iyo caafimaadka, wada tashigu waa inuu ku lug leeyahay HSRs [qaybta 36 (2)]. Loo shaqeeyaha waxaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu u ogolaado wakhti inta

lagu jiro saacadaha shaqada ee loogu talagalay HSR si ay uga wada hadlaan arinta xubnaha ee kooxda shaqada loogutalagalay.

Xitaa haddii aysan jirin HSRs loo shaqeeyuhu waa inuu la tashadaa shaqaalaha [qaybta 35]. Qaybta 36(1) ayaa dejineysa sidii shaqaalaha loola tashan lahaa. La tashiga micnihiisu waxaa weeye in loo shaqeeyayaashu waa inay la wadaagaan macluumaad, ay siiyaan fursad macquul ah oo ay ku sharxaan aragtidooda iyo inay aragtiyahaas tixgeliyaan.

Tusaale, loo shaqeeyuhu ma heysan karo macluumaad khuseeya sababtoo ah inuu adag yahay ama uu aad mid farsamo sare ah yahay, laakiin waa inuu isku dayaa inuu sameeyo macluumaad ku filan oo la heli karo si uu ugu ogolaado shaqaalaha inay ka qaybgalaan wadahadal micno badan leh oo ku saabsan arinta ammaanka iyo caafimaadka.

Ogow : haddii laguu sheego inay jiraan “nidaamka wada hadalka” goobtaada shaqada, tani waa suurtogal laakiinse nidaamkan oo kale waa in laysku raacaa, oo uusan maamulka kaliya go'aansan [qaybta 36(3)].

meesha ay loo shaqeeyayaasha qaarkood aqoonsadaan in la tashiga shaqaalaha iyo HSRs kooda ay tahay dantooda ugu wanaagsan, xaqiiqdu waxaa weeye shaqaalaha ayaa aad ugu dhow inay gartaan khataraha iyo inay soo jeediyaan xalalkooda.

**Tusaale 4**

mulkiilaha goobta xoolaha lagu gawraco, oo ah labadaba sakxada lagu qalo lo'da iyo ariga, oo go'aamiya inuu sameeyo qolka lafa bixinta. Wuxuu doonayey inuu sameeyo qolka lafa bixinta oo loogu talagalay in khatarta lagu baa'biiyo. Guddi ayaa la sameeyey ku lugleh isaga, shaqaalaha maamulka, HSR, AMIEU, dhisaha , ingineerada iyo la taliyayaasha OHS. Mudnaanta ammaanka iyo caafimaadka , baahida waxsoosaarka iyo hubinta tayada ayaa la sameeyey daraasad cilmiyeedna waa la bilaabay si loo ogaado fursadaha ugu fiican.

Mulkiiluhu wuxuu aqoonsaday muhimada qorsheynta khatarta iyo faa'iidada lacag siinta HSR inuu ka qaybqaato nidaamka lagu raadinayo xalka. Qoraalkii qorshaha asalka ahaa ee ugu horeeyey waxaa bedelay nidaamkan. Labadaba loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhuba way ka faa'iideen nidaamka wadatashiga.

**Helida macluumaadka**

Waa waajibaadka loo shaqeeyaha inuu kuu ogolaado helitaanka macluumaadka la xiriira khataraha dhabta aha ama kuwa laga yaabo inay dhacaan [qaybta 69(1)] iyo macluumaad ku saabsan ammaanka iyo

caafimaadka shaqaalaha ee kooxda shaqada loogutalagalay. Macluumaadka caafimaad ee shakhsiga waxaa laga heli kara oo keliya HSR haddii shaqaalaha ay khuseyso uu raalli ka noqdo.

Qaar ka mid ah tusaalayaasha macluumaadka ee aad xaqa u leedahay waa :

- macluumaadka ammaanka ee wershada ee uu bixiyey sameeyaha/ciddii keentay wershada;
- Warqadaha Macluumaadka Ammaanka Qalabka ee waxyaalaha khatarta leh;
- Diiwaanada Asbestos ka ee goobta shaqada;
- qiimeynta lagu sameeyey heerarka sanqada goobta shaqada;
- qiimeynta Ingineerinimo ee ay sameeyaan la taliyayaashu;
- Diiwaangelinta Dhaawacyada.

Tusaalaha sidii aad ula macaamili lahayd macluumaadka lasocodka caafimaadka iyo iyadoo weli la ilaalinayo arimaha gaarka ah ee shaqaalaha khaaska ah:

Audiometric tijaabinta (maqal) ka oo ayaa la sameeyaa; HSR waa inaan loo sheegin in Ali, Anne, Giovanni, Joe, Maria, Mohamed, Pedro, Robert iyo Tranh inay dhega beelayaan (inuu shaqaaluhu doonayo in loo sheego HSR ka mooyee) laakiinse waa in la wargeliyaa HSR in 9 qof oo ku jira DWG ay yeesheen lumitaanka Maqalka ee ay keentay Sanqadhu..

**Tusaale 5**

Goobta cuntooyinka yar yar meeshaad oo shaqaalaha gacantiisa ay qabsatay mishiinka wax jarjara (a mincer), loo shaqeeyuhu wuxuu wargeliyey WorkSafe, sida looga baahan yahay qaybta 38 ee sharciga iyo diiwaanka qoraalka ah ee laga sameeyey shilka. HSR loogu talagalay DWG ee ka shaqeeya mincer ayaa doonayey nuqulka warbixinta. Maamulku wuxuu ku taliyey inuu kani ahaa macluumaad gaar ah wuxuuna u diidey inuu tuso foomka HSR ka.

Shaqaalaha dhaawacmay wuxuu doonayey inuu HSR -ku ku lugyeesho markii lala hadlay maareeyuhu wax ku saabsan wixii dhacay saa daraadeed qaybta 69 (1)(c) ayaa siisey HSR xaqa inuu joogo inta wareysigu socdo. Qaybta 38 (4)(d) ee sharciga ayaa sidoo kale siisey HSR xaqa ah helida diiwaanka uu sameeyey maamulku si loo hubiyo inay ka turjumeyso wixii dhacay.

Wada hadal la socday arimahan ka dib xuquuqda HSR waa la aqoonsaday.

Marka shaqaaluhu uu fiicnaaday si uu ugu soo noqdo shaqada, HSR wuxuu awoodey inuu metelo wadahadalka ku saabsan siinta RTW. Wada shaqeynta HSR micnaheedu wuxuu ahaa shaqo ku noqoshadu waxay u dhacday si aan turxaan lahayn.

**Wakhti Lacag la bixinayo**

Loo shaqeeyaha waa inuu u ogolaadaa HSR wakhti uu shaqada ka nasto iyadoo lacagna la siinayo ilaa inta loo baahan yahay *si uu u sameeyo awoodaa* [section 69(1)(d)(i)]. wakhti intee le'eeg iyo waa maxay arimaha u baahan kara wada xaajoodka. Sarkaalka Taageerada HSR ama Sarkaalka Ammaanka iyo Caafimaadka ee AMIEU ayaa kaa caawin kara wada xaajoodkan.

Waxqabadka sida kormeerka goobta shaqada; la tashiga xubnaha DWG; la hadlida shakhsiyaadka ka socda DWG arimaha ku saabsan OHS; oo ay la socdaan kormeerayaasha kormeerka, , imaanshaha tababarka ama kulamada dhammaan waa inay dhacaan wakhti lacag la bixinayo.

Markii uu jiro kulanka Gudiga Ammaanka iyo caafimaadka HSR ka ku jira guddiga waa inay awoodaan ka qaybgalka inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada. Haddii dhammaan HSRs aysan ku jiran guddiga waa in loo ogolaadaa wakhti ay kulmaan si kuwa ku jiraa ay metelaan dhammaan kuwa kale. Waxaa cad in taasi lagama maarmaan inay tahay meesha ay tahay goob shaqo oo aad ballaaran si ka qabygalka dhammaan HSRs wuxuu noqonayaa guddi aan la maamuli karin.

**Tusaale 6**

hal meel ah oo xoolaha lagu gowraco kulanka Guddiga OHS ma dhicin ilaa gowracayaashu ay soo dhammeeyaan shaqada. Taas awgeed kulamadu waxay badanaa dhici jireen iyadoo aysan ku lugyeelan HSRs .

Waxaa la tilmaamay in HSRs jooga sakxadaha gowracu inay xaq u leeyihiin inay joogaan (waxay ku jireen guddiga) iyo inay xaq u leeyihiin in la siiso lacagta saacadaha dheeraadka ah ee shaqo sababtoo ah kulanku ma dhaceynin saacadaha caadiga ah ee shaqo. Sababtoo ah inay bixiyaan lacagta wakhtiga HSRs maamulka badhkii waxay u arkeen faa'iido in kulanka la qabto saacadaha caadiga ah iyo maalinta si loogu sameeyo xoogsatada bedeli kara gowracayaasha. Ka dib kulamada way socon kareen iyadoon la waxba aysan hakin dadka ugu badanina ka soo qaybgalaan.

Meeshii ay jiraan xiliyo badan oo shaqo waxaa suurtogal ah in la qabto kulanka gudiga wakhtiga marka ka soo qaybgalka dhammaan HSRs dhammaan xilliyada ay u baahan doonaan ka soo qaybgalayaan ka soo qaybgala saacadahooda shaqo wax ka baxsan oo saa daraadeed la siiyo heerka shaqeynta saacado dheeraad ah.

**Kormeerida**

Qaar badan oo ka mid ah awoodaha HSRs waxaa lagu faahfaahiyey qaybta 58 ee Sharciga . Kormeeridu waa mid ka mid ah awoodaha.

1) Wakiilka ammaanka iyo caafimaadku ee kooxda shaqo ee loogu talagalay waxaa laga yaabaa inuu...-
   a) uu kormeero qayb kasta oo ka mid ah goobta shaqada ee uu ka shaqeeyo xubin ka mid ah kooxda shaqada ee loogutalagalay –

i) wakhti kasta ka dib bixinta ogeysiin macquul ah loo shaqeeyaha ay khuseyso ama wakiiladiisa; iyo
ii) isla markiiba lacala haddii shil dhaco ama xaalad kasta oo ku lug leh khatar islamarkiiba heysata ammaanka iyo caafimaadka qofkasta.

**Tusaale 7**

waxaan soo socdaa waa sharaxaad uu ka bixiyey HSR hore kormeerada ogeysiis la bixiyey:

“Sidaan shaqada u qaban jirey, waxay ahayd inaan sameeyo kormeer, waxaan siinayaa horjoogaha 48 saacadood ogeysiis ah saa daraadeed si uu sameeyo inuu I bedelo maalintaas badhkeed ama maalintaas, wax kasta oo ay ku qaadato. Ka dib waxaan qaadanayaa warqado iyo qalin ka dibna waxaan socod ku kormeerayaa goobtayda shaqada ee DWG. Waxaan siinayaa wakhti anoo la hadlaya shaqaalaha jooga DWG -ga lacala haddii ay jiraan dhibaatooyin aanan arkin anigu. Waxaan qorayaa liis dhibaatooyin ah , (haddii ay wax jiraan), waxaan ku qorayaa taariikhda ka dibna waxaan ka sameynayaa nuqulo. Waxaan siinayaa nuqul maareeyaha ay khuseyso oo aan weydiinayaa inuu saxiixo nuqulkayga. Dhibaatooyinka khatarta ah waa loo xaliyaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Haddii ay jireen arimo badan waxaan iskudeyayaa inaan mudnaan kala siiyo iyadoo ku saleysan siday ukala daran yihiin.”

HSR wuxuu kormeeri karaa qayb kasta oo ka mid ah goobta shaqada ee xubin ka tirsan DWG ka shaqeyso iyo goobta shaqaduna waa meel kasta oo qof ka shaqeeyo. Ma aha oo keliya dhismaha gudihiisa. Haddii ka mid yihiin xubnaha DWG, baabuurta iyo meelaha alaabada la geeyo ayaa ka midnoqon kara kormeerka.

Si loo sameeyo kormeerka isla markiiba haddii shil dhaco [qaybta 58 (1)(a)(ii)] waa caddaan inay khasab tahay inuu jiro nidaam waa in HSRs la wargeliyaa marka shil kastaa dhaco. HSRs waa inay isu tagaan oo sawiraan nidaamka ay ku talinayaan lana xaajoodaan maamulka si ay u jiraan nidaamyo laysku raacay oo ku saabsan sidii isla markiiba laguu soo wargelin lahaa. Waxaad isticmaali kartaa Sarkaalka Taageerada HSR inuu ku caawiyo adiga.

**Tababar**

HSRs iyo Kuxigeenka HSRs waxay xaq u leeyihiin inay helaan tababar siinaya xirfada ku haboon iyo aqoonta [qaybta 67].

Bixiyayaasha tababarka waxaa aqbala WorkSafe iyo AMIEU oo bixiya tababar la aqbalay. Tababarkeena HSR waa midka kaliya ee xoogga saara inta khatarood ee Mihnada Hilibka. Khataro khaas ah oo aan ka hadalno waxaa ka mid ah Khataraha Degaanka, Gacan wax ku sameynta, iyo Isticmaal ku badinta Shaqada, Qalabka iyo Wershada ( oo ay ka mid yihiin sida midida loo qabanayo), sanqada, waxyaalaha khatarta ah, Meelaha Xiran iyo Cudurada Shaqada, khaas ahaan.

**Koorsada aad dhiganeyso waxaa dooraya HSR** isagoo la tashanaya loo shaqeeyaha [qaybta 67 (3)(c)]. La tashiga micnahiisu waxaa weeye HSR waa inuu:

- wargeliyaa loo shaqeeyaha koorsada la soo jeediyey;
- siiyaa loo shaqeeyaha fursada ah inuu ka soo jeediyo aragtiyaha ku saabsan ku haboonaanta koorsada la soo jeediyey iyo inuu bedel ku taliyo; iyo

- qaato fikradahaas iyo bedelka la soo jeediyey oo uu tixgeliyaa *marka adiga HSR ku aad go'aansato koorsada aad qaadaneysid*.

Loo shaqeeyaha waa in la siiyaa ogeysiis ah 14 maalmood oo ku saabsan tababarka [qaybta 67(2)], AMIEU caaddi ahaan waxay siisaa loo shaqeeyaha 4 toddobaad ogeysiis ah si aan wax ukala saarno labada toddobaad ee ugu horeeya haddii ay jiraan wax adkaada.

Haddii aad u baahan tahay inaad hesho caawimaad xagga kala saarida tababarkii aad qaadan lahayd waxaa jira Qaybta dhexe ee WorkSafe oo aad caawimaad weydiisan kartid. Wakhtiga aan qoreyno kan qofkaas waxaa layiraahdaa Jill McCabe kalana xiriir 03 9641 1555.

loo shaqeeyuhu waa inuu, haddii uu ka codsado HSR, u ogolaadaa HSR wakhti fasax shaqo ah , iyadoo lacagtiisa la siinayo:

- si uu u tago koorso horudhac ah (5 maalmood dheerkeedu yahay) oo ah OHS ka dib marka la doorto;
- oo uu qaataa tababar xusuusineysa ugu yaraan hal mar sannadkii ka dib markuu dhammeystiro koorsada tababarka bilowga ah; iyo
- inuu ka tago tababarada kale ee la aqbalay.

Lacag siinta inta tababarku socdo waxay u dhigantaa wixii aad xaqa u lahayd haddii kale haddii aad shaqeyn lahayd mudadaas. HSRs waa inaan faa'iido daro laga dhigin sinaba natiijo ahaan helida tababarka uu Sharciga OHS xaqa u siinayo inay helaan
Tababarka HSR waa qayb ka mid ah waxqabadka shaqada la xiriira ee caadiga ah. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho lacagta caadiga/aad fileysay inaad shaqeysato inta koorsada dhigeynaysid oo ay ku jiraan xuquuqda aad leedahay ee la xiriira xilliga shaqada, wakhti dheeraad ah shaqeynta, waajibaad ka badan kaagii sameyntiisa, gunno ama heerarka ciqaabta, ama wax la mid ah wixii aad ka heli lahayd shaqada markaad shaqeynaysid.

Waxaa jira xaalado ay HSRs laga yaabo inay ku tagaan koorsooyin la qabanayo saacadaha caadiga ah ee shaqada wax ka baxsan. Tusaale haddii HSR:

- uu caadi ahaan shaqeeyo laba maalmood toddobaadkii uuna ka qayb galo koorso soconeysa shan maalmood oo isku xigta;

- uu caadi ahaan leeyahay maalintiisii ku soo aaday ee fasaxa inta koorsadu socoto; ama
- uu caadi ahaan leeyahay xilli shaqo oo aan isku  dhicin ama iskudhaca oo keliya saacadaha koorsada oo keliya.

Wakhti aad ku kharashgareysay HSR ku ( oo ay ku jiraan shaqaalaha wakhti wakhtiga shaqeeya) waa in uu loo shaqeeyuhu ula macaamilaa sidii iyagoo shaqada joogay.

Waa xaaladaha sida HSRs badanaa ka shaqeeya qolka hilibka ee mihnada tafaariiqda ee sabtida iyo axada ee arimaha sida wakhti dheeraad ah shaqeynta iyo heerka calagta ee ciqaabta ay tahay in la kala saaro. Qabanqaabiyayaasha Ururka shaqaalaha ayaa loo isticmaalaa inay caawiyaan HSRs inay la macaamilaan arimaha sida tan.

Tababarka HSR waa waxqabad shaqo. Loo shaqeeyayaashu waa inay bixiyaan lacagta koorsada iyo wixii kharash ah ee kale ee la xiriira tegitaanka koorsada, oo ay ka mid yihiin:

- u safrida iyo ka soo safrida koorsada la aqbalay ( meesha uu safarku ka badan yahay ka caadiga ah ee shaqada); iiyo
- how, cunto, kharashaadka aan la fileynin meesha koorsada la aqbalay ay ka fog tahay goobta shaqada.

Taas waxaa weheliya Tababarka Horudhaca ah (tababarka 5 -ta maalmood) iyo Tababarka wax xusuusinta ee labadaba HSRs iyo Kuxigeenada HSRs ay xaqa u leeyihiin, waxaa jiri kara tababaro kale oo ay aqbaleen WorkSafe [qaybta 69 (1)(d)(ii)]. Loo shaqeeyaha waa inuu u ogolaadaa HSRs inay tagaan koorsooyinkan oo kale haddii ay khuseeyaan DWG. Ogow koorsooyinkan si toos ah ma aha waxay xaq ugu leeyihiin Kuxigeenada HSRs, inkastoo lagala xaajoon karo loo shaqeeyaha.

**Tasiilaadka**

Qaybta 69 (1) (e) ee Sharciga waxay leedahay in loo shaqeeyaha uu bixiyo

- tasiilaadka iyo caawimaada siday lagama maarmaan u yihiin ama ama ay u qoraan sharcigu  si loogu ogolaado HSR ay isticmaalaan awoodooda/deeda.

Meesha tani ay tahay qoraal guud waxaa jira waxyaalo loo aqoonsaday tasiilaadka aasaasiga ah. Kuwaan waxaa ka mid ah:

- helitaanka looxa ogeysiiska halkaas oo ogeysiiska ku saabsan OHS lagu soo dhejin karo ;
- helida taleefan;
- helida fakis mishiin;
- helida qol aad kula kulantid xubnaha DWG-gaaga;
- helida sawire (a photocopier);

- armaajo khaanado leh halkaas oo aad ku keydsan karto dhammaan diiwaankaaga;
- helida nuqulka sharciga khuseeya iyo shuruucda ( ama xitaa nuqul aad adigu leedahay);
- helida kumbiyuutar leh interneet – WorkSafe had iyo jeer waxay gelisaa macluumaadka cusub iyo horumarka OHS website keeda ah http://www.worksafe.vic.gov.au waxayna u qaataan in HSRs -ku ay heli karaan;
- helida kamarada si sawiro looga qaado caawiya marka la baarayo shilalka iyo inaad ka sameyso wax soo jeedin arimaha ku saabsan DWG guddiga ammaanka iyo caafimaadka; iyo
- helida qalabka farsamada sida mitirada codka, mitirada nalka, iwm.

Tani ma aha liiskii go'an, waa tusaale tasiilaadka ay qaar ka mid ah HSRs la siiyey.

**Bixinta Ogyeiisyada Hagaajinta**

OK waxaa laguu doortay HSR, waxaa lagu siiyey tasiilaad, waa lagu dejiyey run ahaantii maadaama lagula tashanayo, waa lagu tababaray waxaanad sameynaysay kormeer, waxaad la hadashay shaqaalaha caddeeyey inay jirto khatar aan waxba laga qaban. Waxaad hubtaa in sida shaqada loo qabtaa aysan ahayn mid ammaan ah oo aysan ahayn mid aan khatar ku haynin caafimaadka ( waxaan u jeedaa waxaad rumeysan tahay in loo shaqeeyuhu uu jebiyey sharciga ). Saa daraadeed maxaad sameynaysaa?

Waxa ugu horeeya ee aad sameynayso waxaa weeye inaad dhibka ka warbixiso uu aad sameyso wada hadalka wakiilka loo shaqeeyaha si aad isugu daydo in arinta lla xaliyo [qaybta 73]. Haddii sidii loo daaweyn lahaa dhibkan laysku raaco waxaad u baahan tahay inaad hubiso in la sameeyo jadwal si aad u ogaato marka wax dhici doonaan. Haddii aysan jirin xal laysku raacay ama jadwal waxaa jira awoodo kale oo aad leedahay HSR ahaan.

Waa inaad isku deydaa in dhibaatooyinka lagu xaliyo wada xaajood, laakiinse haddii taasi aysan xalin arimaha waxaad soo saari kartaa Bixinta Ogeysiiska Hagaajinta [qaybta 60]. Si aad Sharciga si kale ugu tiraahdo:

Haddii HSR ay rumeysan tahay in arimo macquul ah awgood in qofku –

- uu jebinayo waxa Sharxigu ama ogoshahay; ama
- uu ku jebiyey qofku waxa uu ogolyahay sharcigu oo laga yaabo inay sii socoto ama lagu celiyo –

HSR waxaa laga yaabaa inuu soo saaro PIN oo u baahan in qofku inuu daaweeyo jebinta sharciga. PIN waa –

- sheeg sababta aad u rumeysan tahay in sharciga la jebiyey, waxaad ku saleynayso rumeyntaada, iyo
- qaybtee sharciga ama qaybtaa shuruucda OHS ayaa la jebiyey; iyo

- taariikhda khaaska sheeg ee ay tahay in la hagaajiyo( ugu yaraan 8 maalmood ka dib markaad soo saarto PIN).

Ma aha lagama maarmaan laakiinse waxaad ku dari kartaa tilmaamo ah sidii loo xalin lahaa jebintan sharciga [qaybta 61].

PIN waa amar sharci ah. Qofka loo saarey isma ilowsiin karo [qaybta 62].

haddii aadan dooneynin inaad raacdo PIN, 7 maalmood gudahood waxaa laga yaabaa inay weydiiyaan kormeeraha WorkSafe inuu yimaado oo uu baaro xaaladaha PIN loo soo saarey. Kormeeruhu wuxuu ayidi karaa PIN ka, ama waxbuu ka bedeli karaa ama wuu kansalayaa PIN ka [qaybta 63 (3)(b)]. waa inuu jiraa ogeysiis qoraal ah oo ka yimaadaa kormeeraha oo sheegaya go'aankooda iyo sababahooda ay go'aankaas u gaareen [qaybta 63 (5)].

haddii aadan tixgelin fekerka kormeeraha inuu sax yahay racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka, sidoo kale qofka PIN ka laga soo saarey.

Waa in la ogaadaa in erayada xuquuqda HSR ee qaybaha PIN waxaa weeye waxay ka soo saari karaan PIN “qof” ma aha loo shaqeeyaha oo keliya. Tani aad ayey muhiim u noqon kartaa marka loo shaqeeyahaagu uu yahay shirkadaha shaqaalaha kireya ee aan maamulin goobta shaqada.

**Tusaale 8**

Shaqaalaha hal meel ah oo xoolaha lagu gowraco waxaa dhammaan shaqaaleeyey shirkad shaqaalaha kireysa. Maamulka goobta shaqada ( loo shaqeeyaha ) wuxuu dalbaday in gowracayaashu iyo lafa bixiyayaashu inay xirtaan gacmo gashi, si kastaba ha ahaatee cidna ma siin qalabkan ilaalinta shakhsi ahaaneed.

Markii HSR uu aaday loo shaqeeyaha shaqaalaha kireeya oo uu weydiiyey in gacmo gashiga la bixiyo waxaa loo sheegay inaysan masuuliyadooda ahayn maadaama aysan maamulin meesha xoolaha lagu gowraco; saa daraadeed waxay aadey loo shaqeeyaha oo yiri inayan ahayn masuuliyadiisa maadaama aysan ahayn loo shaqeeyaha! Waxaa cad in tani tahay isdhaafin maadaama aynan ayan ahayn masuuliyada shaqaalulu inay bixiyaan qalabka ilaalinta shakhsiyeed Sharciga marka loo eego.

HSR, inkastoo Ururka shaqaalaha, uu weydiiyey kormeerayaasha WorkSafe si ay u sharxaan cidda ay suurtogalka tahay in laga soo saaro PIN. Jawaabta kormeerayaashu w*axay ahayd HSR waxay ka soo saari karaan PIN qof kasta mana aha loo shaqeeyaha keliya.* Markaan, kormeerayaashu waxay la hadleen loo shaqeeyaha shaqaalaha kireeya iyo loo shaqeeyaha wershada waxayna kula taliyeen waa inay wada shaqeeyaan si ay isula gartaan ciddii bixin lahayd PPE; laakiinse ma ahayn masuuliyada shaqaalaha inay soo iibsadaan gacmo gashi. Gacmo gashiga waa la siinayaa. Haddaba HSR ma ahayn inay soo saaraan PIN.

**Tusaale 9**

HSR ka qolka hilibka tafaariiqda waxay saluugsanaayeen in la jebiyey qaybta 21 ee Sharciga iyo shuruucda Gacan Shaqo ku qabashada sababtoo ah shaqada miishiinka wax lagu duubo waxay ahayd mid aad u soo noqnoqoneysa, waxay ku lug leedahay qaadida culeys, ka shaqeynta meel dhererkeedu garabkaaga ka sareeyo ahna meel ka fog 30 sintimitir jirka saacado badan maalin kasta. Hilib duubayaasha waxaa ku dhacayey dhaawacyada muruqyada ee garbaha, suhulada iyo cumaacumaha.

HSR wuxuu u yimid maareeyaha hilibka oo ogolaaday inay jirtay dhibaato laakiinse uusan heynin wax miisaaniyad ah oo uu ku baabiiyo ama khatarta ku yareeyo. Maareeyaha hilibka iyo HSR waxay arinta u geeyeen maareeyaha bakhaarka oo kula taliyey inay arinta ka sheegeen kulanka guddiga caafimaadka iyo ammaanka. Waxba ma sii socon oo ma dhicin.

Gebi ahaanba niyad jebida iyo arkida dhaawacyada hilib duubayaasha oo sii xumaanaya HSR wuxuu u qoran PIN wuxuuna siiyey maareeyaha bakhaarka kaas oo wacay xafiiska sare ee Sarkaalka OHS kaas oo u yeeray kormeeraha WorkSafe.

Kormeeruhu wuxuu ku taageeray PIN ka wax ka bedelid. Wax ka bedelidaas waxay ahayd in bakhaarku uu hawl geliyo la taliye qiimeeya khataraha gacan hawl ku qabashada oo ku taliya xalal iyo inuu siiyo wakhti ka dheeraad ah bakhaarka ka ku qoran PIN. Tan ayaa la sameeyey ugu danbeyntiina dukaanka weyni wuxuu soo iibsaday mishiinka wax duuba oo cusub.

Waxoogaa bilo ah ka dib HSR ka ayaa gartay Sharci jebin kale oo ah qaybta 21 iyo shurcuucda Gacan Hawl ku qabashada. Tani waxay ku lug lahayd ku rarida iyo ka dejinta baakado hilib ah halkaas oo baakado culeyskoodu ka bilaabanayey 22kg ilaa 38kg, waxayna ahaayeen in laga dejiyo baleetyo yaal dhulka ee qolka bakhaarka oo isu saaran lakab lakab qolka qabow gudihiisa. Lakabyadaan waxay u dhaxeeyaan 30 cm kuwo ka sareeyo dhulka oo dhererkoodu yahay ilaa 2 mitir. Dhaawaca muruqyada ee la ogaaday inuu ka dhasho tan meesha garbaha iyo dhabarka hoose ee hiliblayaasha iyo kuwa hilibka xirxira.

HSR wuxuu ka sheegay kulanka guddiga OHS arinkan iyadoo uu taageerayo maareeyaha hilibka. Mar labaad arinta lagama hadlin dukaanka weyn iyadoo weliba dhawr jeer la soo jeediyey. HSR wuxuu bixiyey PIN. Wakhtigan maamulku uma wicin kormeerayaasha WorkSafe laakiinse wuxuu soo iibsaday atrolley leh bayteri wiish maqas bayreri ah le. Tani waxay caawisay inay dhibka xaliso( daaweynso jebintii sharciga).

Ma aha waxaan caadi ahayn inuu maamulku is ilowsiiyo arimaha uu soo jeediyo HSR ilaa uu bixiyo PIN. Liiskan taariikheysan ( ama xusuus qorka ) waa si wanaagsan aad kula socon karto inta waxyaalahni qaadanayaan. Haddii ay jiraan wax dhibaato ah ee wax sameynta waxaad qori kartaa PIN.

Waxaa jira goobo shaqo halkaas oo dhibaatooyinka lagu xaliyo iyadoo la isticmaalayo nidaam wada tashi ah kanaana ah habka aan la gaari karin. Waxay u muuqaneysaa si kastaba ha ahaatee in meelo badan oo ah goobo

shaqo arimaha ugu khatarsan waxaa lagu xalin karaa oo kaliya ka dib marka HSR ku uu bixiyo PIN. Xalinta waxay faa'iido u leedahay loo shaqeeyaha , maadaama ay ka caawineyso inay yareyso dhaawaca. Waa inaan lagu gelin booska halkaas oo aad si ku celcelis leh aad ula murmeysid loo shaqeeyaha. Haddii aadan ku xalin karin arin wada hadal, waa inaad xasuusataa inaad qori kartid PIN.

Hal feker soo jeedin ah oo ka timid HSR hore ayaa aheyd “ haddii ayan I dhegeysan waxaan tusi doonaa PIN maareeyaha ay arintu khuseyso oo u sheegayaa haddii aynaan bilaabin inay dhibkaan ku xaliyaan laba maalmood gudahood, waxaan saxiixi doonaa PIN ka oo aan siin doonaa. Sidaan wax u qabashada ayaa aniga ii shaqeysay, weligayna hal Pin ayaan saxiixay oo aan bixiyey. PINs ku waa si faa'iido badan oo aad ku heli karto inuu loo shaqeeyahaagu kuu arko inaadan ciyaareynin. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad la tashato la taliyahaaga si aad u xaliso arimahan ka hor intaadan qor PIN. Haddii wada tashigu isu bedelo Feestadii hadalka “(Talkfest)” qorida PIN waa si wanaagsan oo aad horu ugu socon kartid.”

**Tilmaamaha aad Shaqada ku Joojineysid**

Sida cad ee ah PIN ku waa inuu siiyaa ugu yaraan 8 maalmood si uu ugu saxo jebinta sharciga. Taasi maha tallaabo lagula macaamilo xaalada u baahan in khatar dhaceysa in wax laga qabto. Aynu wajahno haddii uu jiray meel ay ka daadaneyso ammonium oo ay ku daadaneyso qolka lafa bixinta ma noqon doonto wax haboon sugitaanka 8 maalmood ka hor intaan la joojin daadashada. Waxaa jira xaalado badan halkaas oo PINs laga yaabo inay lagama maarmaan yihiin laakiinse kuma filna. Marmarka qaarkood waxa loo baahan yahay waa tTilmaamaha Shaqada in La joojiyo.

Arintan waxaa lagaga hadlay qaybaha 74 iyo 75 ee Sharciga. Arimaha ay daboolayaan qaybahani waxay yihiin khaas ahaan” *shaqo ku lug leh dhibaatto isla markiiba ku ah ammaanka iyo caafimaadka qof kasta*”

Haddii –

a) arin khuseysa caafimaadka ama ammaanka ay ka dhalato goobta shaqada ama sida uu u dhaqmayo loo shaqeeyuhu; iyo
b) arintu waxay khuseysaa shaqo ku lug leh dhib isla markiiba ku dhacaya caafimaadka ama qof kasta; iyo
c) iyadoo la eegayo xaalada handadida iyo darajada khatarta, kuma haboona in la raaco nidaamka lagu dejiyey qaybta 73 –

loo shaqeeyaha ama wakiilka ammaanka iyo caafimaadka loogu talagalay kooxda shaqo ee loo qoondeeyey marka loo eego arinka la soo jeediyey, ka dib la tashi u dhaxeeya iyaga tilmaan in ay shaqadu joogsato.

Si sahal ah u dhig, haddii ay jirto xaalad halkaas oo ay dhici karto in dad si daran loo dhaawaco ( ama dillo) xaalad dhakhso ah waa inaad ula soo qaadaa wakiilka loo shaqeeyayaasha isla markiiba oo aad isku deydaa in

laysku raaco shaqada joojinteeda ( mishiinkaas ama ka bixida meeshaad ama wax kasta oo loo baahan yahay si dadka looga saaro khatarta). Haddii aadan ogolaan ficilka midkiin uun baa tilmaami kara in shaqada khatarta ah la joojiyo

haddii aad xaaladahan dalabto shaqo joojin shaqaalaha shaqadooda la saameeyey waa inaysan isla markiiba ka tegin goobta; taas waxaan uga jeedaa isla markiiba gurigii ha aadin. Badanaa waxaad aadi kartaa qolka qadada ama meel la mid ah. Sababtu waxay tahay loo shaqeeyuhu wuxuu u diri karaa dadka shaqadooda la joojiyey waajibaad kale oo ku haboon.

Haddii qofka maamulka ahi iyo HSR aysan isku raacin shaqo joojinta oo aad adigu tilmaamo bixiso waa inaad u jeertaa kormeerka. U sheeg inay arintu tahay dhib degdeg ah oo ku imanaya ammaanka iyo caafimaadka iyo tilmaan ah shaqada in la joojiyo. Waa inay yimaadaan goobta shaqada isla markiiba xaaladahan oo kale, badanaa laba saacadood gudahood [qaybta 75 (1); (2); and (3)].

haddii kormeeruhu uu soo saaro Ogeysiiska mamnuucida ( oo ah inaan amarkoodu shaqeyn); ama uu qoraal ka dhigo in shaqaalaha ay si macquul ah u saluugsanaayeen wax ku saabsan ammaankooda iyo caafimaadkooda ( xitaa haddii ay khaldan yihiin ) shaqaalaha waa in lacagtooda la siiyaa sidii kuwo shaqeynayey ilaa dhibaatada la saxo [qaybta 75 (4)].

**Tusaale 10**

meesha xoolaha lagu gowraco waxaa ka jirey dhib laynka lo'da bahalka maqaarka bixiya.
HSR waa la wargeliyey dadka sida caadiga uga shaqeeya maqaar bixiyaha waxay ogaadeen in sagxada haydarooliga ah ee uu ku safro bixiyaha maqaarku kor iyo hoos wuxuu u muuqday mid “ boodayey” wax badan maadaama heer kasta oo uu leeyahay ramku inuu u dhaqaaqayey qaybta kale ee ramka. Waxaa dhibka soo kordhinayey in ramku u boodayey wax yar xagga hoose .

HSR wuxuu kala hadlay arinta maamulka oo ku jawaabay “ waanu eegaynaa” kulanka ku xigga ee guddiga Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada ayaa dib loogaga hadlay HSR ku wuxuu doonayey in la helo sakxad leh hal ram oo keliya oo la xaqiijiyey inuu ka ammaan badan yahay meelaha kale ee hilibka lagaga shaqeeyo. Shirkadu waxay mar labaad ku adkeysatay inaysan jirin wax ka xun ramka iyo shaqaaluhuna ama waa caajiseen ama waxay doonayeen oo kaliya in shirkadu lacag ku lumiso nooc ka mid ah ka aarsasho.

HSR oo ku adkeystay hal sakxad kaliya waxaa lagu yiri “ arinta aad uma xuma – kaaley adigu oo arka nafsad ahaantiinu”. HSR waxaa sidoo kale loo sheegay inuu aad qaali u ahaa in la soo iibiyo iyo rakibaaduna aad bay qaali u tahay wixii wax soo saar ah ee luma. HSR maalin ayuu ka shaqeeyey maqaar bixiyaha khibrad shakhsiyeed ahaan wuxuuna ogaaday gigsanaan caadi ah ka sokow xannuunka dhabarka iyo jilbaha ka hor intaysan dhammaan hal xilli shaqo.

Maadaama hal shaqaale uu hadda ku jiro WorkCover isagoo qaba dhaawac dhibarka la xiriira arintan awgeed wada hadal intaas ka badan baa lala qaatay maamulka, HSR iyo HSR kale oo khibrad sare leh oo kal socda waax kale .

Ugu danbeyntii shirkada waxay go'aansatay inaysan weli jirin wax sabab ah oo loo sameeyo ram sagxad keli ah laakiisne waxay saari doonaan khadiifad cinjir ah meesha uu qof kastaa ka shaqeeyo.

Waxaa cad in tan aysan ku filneyn saa daraadeed HSR wuxuu soo saarey shaqo joojin ku saabsan maqaar bixiyaha sababtoo ah khatartiisa soo socota ee degdega ah ee dhabarka , lugta iyo qoorta dhaawacyadaas la xiriira "boodistaan" daran ee hoose sida ay noqotay.

Waxaa kale oo uu bixiyey HSR oo la socotay shaqo joojinta PIN wuxuuna ku taliyey in xalinta dhibkaan uu yahay in la sameeyo sakxad hal ram ah oo baabiineysa khatarta " boodista" xoogga ah . HSR wuxuu sidoo kale ku daray Pin waa in wada hadal dhacaa oo u dhaxeeya HSR iyo shirkada marka la raadinayo daawo si loogu ogolaado dadka isticmaalaya mishiinka furada ah inay ka wada hadlaan waxa faa'iidaha iyo khasaaraha waxa la rakibo doono.

Tan ka dib niceties waa joogsatay shirkaduna waxay u yeertay kormeerayaasha WorkSafe si ay u qaadaan shaqo joojinta iyo PIN ka.

Kormeerayaasha ayaa loo yeeray waxaana yimi laba kormeere oo ka socda WorkSafe goobta shaqada si ay u kormeeraan maqaar bixiya oo ay wada hadal ula yeeshaan dhammaan dadka ay khuseyso. Ka dib waxaa dhacay kulan kooxeed halkaas oo kormeerayaashu ay bixiyeen wixii ay heleen.

Kormeerayaasha waxay akhriyeen qoraalkii la qaaday wakhtigii wada hadalka ee ku saabsanaa arinka iyo buuggaagta warbixinta dhaawaca iyagoo helay dhaawacyo badan oo la mid ah oo ku dhacay shaqaale kala duwan ilaa iyo intii arinkan markii ugu horeysay la sheegay waxooga wakhti ah ka hor-iyadoo aysan jirin wax isku day ah oo lagu saxayo dhibka, oo ilaa wakhti ka dib sii xumaaday. Tan awgeed maadaama ay jireen meelo hilibka laga shaqeeyo oo badan oo shaqeeya hadda oo leh ram sagxad kaliya leh si laysaga ilaaliyo dhaawacan oo kale kormeerayaashu waxay ayideen oo adkeeyeen PIN ka.

Kormeerayaashu sidoo kale waxay soo saareen Ogeysiiska Mamnuucida maqaar bixiyaha tan micnaheedu waxaa weeye ilaa maqaar bixiyuhu uu yeesho ku shaqeyn ammaan ah - waxaa go'aansaday kormeerayaasha- wax shaqa ah oo dhici kartaa ma jirto iyadoo la isticmaalayo mishiinkan. Taas oo ah waxay taageereen shaqo joojinta HSR.

Maadaama silsilada lo'du aysan shaqeyn karin maqaar bixiyaha la'aantiis warbixinta kormeerayaasha goobta waxay u ogolaadeen shirkada inay siiso shaqaalaha" waajibaad ku haboon oo bedel ah" si ay u daboosho mushaarka shirkadu ay siineyso Sharci ahaan. Shirkadu waxay codsatay in HSRs iyo

wafdiga Ururka shaqaaluhu ay dib ugu haraan kulan si loogu ogolaado xoogsatada in la siiyo waajibaad ku haboon iyo in la go'aamiyo waxa ku haboon gawracayaasha in la siiyo.

Maalinta ku xigta HSR waxaa la wargeliyey qiyaastii tobankii subaxnimo in silsilada lo'du in la xiri doono saddex toddobaad sababtoo ah " dayactic guud" dhammaan shaqaalaha silsilada lo'da ka shaqeeya " shaqada waa laga joojinayaa" ilaa war danbe.

HSR waxay si cad u arki kareen waxyaalaha aan runta ahayn ee dhacdooyinkan laakiinse waxay ahayd " nasiib xumo waxaan u xiri karnaa dib u cusbooneysiin mar alaale markii aan dooneyno waa shirkadeenii".

Mid ka mid ah kormeerayaasha WorkSafe ayaa mar kale loogu yeeray wecitaanka shir ah. Shirkada ayaa ku ciyaartay isku kaar kormeeraha iyadoo leh "wax shaqo ah kuma laha go'aanka la gaaray maalintii hore, waxay qorsheynayeen inay cusbooneysiiyaan maqaar bixiyaha iyo meelaha ku hareeraysan ilaa wakhti tan ayaa qorshihii hore u soo qaaday.

Wada hadal kululaaday oo dheer ka dib kormeeruhu mar labaad ayuu siiyey loo shaqeeyaha doorashooyinka hada la hayo

- raac ogeysiiska mamnuucida;
- hagaajinta maqaar bixiyaha iyo shaqaalaha lacag siinta – ka tegida wixii ahaa " waajibaadka haboon" ee shirkada iyo Ururka shaqaalaha/Shaqaalaha si ay sameeyaan; ama
- u codso si toos ah; AMA
- in la geeyo maxkamada Hoose wixii ah jebinta Sharciga.

Arinta waa la xaliyey wecitaankaas ka dib. Caawimaada shirkada ka dib ee ah inay siiso mishiin shaqo oo ammaan ah shirkadu waxay meel dhigtay oo ay soo gadatay oo rakibtay ram ka sagxada keliya leh saddex maalmood gudahood! Shaqaalaha qaarkood waxaa la siiyey waajibaad bedel ah oo ku haboon kuwa kalena waxaa la siiyey lacagta maalmaha aysan shaqo ammaan ahi ool.

**Caawimaada dadka kale**

maadaama HSR ahaan aad xaq leedahay saa daraadeed caawimaad ka raadso qof kasta [qaybta 58(1)(f)]. Tan micnaheedu waxaa weeye inaad heli kartid mid ka mid ah HSRs kale inuu yimaado oo uu eego wax ka jira DWG - gaaga, ogow Tusaalaha 10 HSR sakxada lo'da wuxuu ku lug lahaa HSR kale iyo Tusaalaha 9 HSR wuxuu ku lug lahaa Sarkaalka Ammaanka iyo Caafimaadka Ururka shaqaalaha. Haddii aad dareemeyso inaad u baahan tahay caawimaad waxqabad kasta waxaad caawimaad weydiisan kartaa HSR kale, Sarkaalka Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqaalaha ama Sarkaalka Taageerada HSR. Waxaa laga yaabaa oo aad caawimaad weydiisan kartaa kormeerayaasha goobta shaqada, la xaajoodka maamulka, wax ka geysashada siyaasada ama isbedelada goobta shaqada/ socodka shaqada/ wershada ama waxyaalo, ama inaad hesho macluumaad ku saabsan kontoroolka si loo baabiiyo ama yareeyo khataro.

Guud ahaan loo shaqeeyuhu waa inuu ogolaadaa qofka inuu soo galo goobta shaqada markaad weydiisato caawimaadooda. Sababta kaliya ee ay ku diidi karaan waxay noqoneysaa sababtoo ah qofku ma aha mid ku haboon, qofku ma yaqaan wax ku filan oo ah ammaanka iyo caafimaadka shaqada [qaybta 70(1)]. Haddii loo shaqeeyuhu isku dayo inuu taas ka murmo waa lala doodi karaa [qaybta 70(2)].

**Tusaale 11**

HSR ka alaabta yar yar ee goobta shaqada ee wax wershadeysa ayaa ka dooneysay caawimaad Sarkaalka taageerada HSR. Shirka soo socda ee guddiga ammaanka iyo caafimaadka 'nidaamyada laysku raacay' ee la soo jeediyey ayaa ahaa in laga wada hadlo. HSR wuxuu doonayey caawimaad xagga ka xaajoodka nidaamyada. Codsigana wuxuu ka dhigay qoraal iimeyl uu u diray Sarkaalka Ammaanka Iyo Caafimaadka Shaqada mana uu helin wax jawaab ah. Mar labaad wuxuu u direy iimeyl Sarkaalka OHS si uu raadsado ogolaansho ku saabsan martiqaadida Sarkaalka Taageerada HSR. Mar labaad Sarkaalka OHR ma soo jawaabin.

Sarkaalka Taageerada ayaa wergeliyey maamulka, isagoo u qoraya, inuu qasdayey inuu yimaado kulanka guddiga si uu uga caawiyo HSRs kala xaajoodka nidaamyada. Markii isaga iyo HSR ay aadeen si ay u tagaan kulanka waxaa la kulmay maamulka waxaana loo diidey inay galaan kulanka. Kulanka guddiga ee ammaanka iyo caafimaadka wuu socday markii Sarkaalka Taageerada iyo HSR ka debada lagu celiyey.

Waxaa ku xigay in HSR uu codsaday caawimaada inuu sameeyo kormeer. Asal ahaan wuxuu doonayey qof kale oo la eega. Wuxuu la hadlay Sarkaalka OHS oo yiri waa ka fekeraynaa. Codsiga waxaa loogu direy iimeyl dhawr wakhti. Maamulka ayaa diidey, isagoo leh HSR waa la tababaray waana inuusan u baahan wax caawimaad ah.

HSR wuxuu soo saarey PIN leh loo shaqeeyuhu wuxuu jebiyey qaybta 58(1)(f) oo siisey HSR xaqa uu caawimaad uga doonan karo qof kale. Kormeerka ayaa maamulku u yeeray. Wakhtigan kormeeruhu wuxuu kansalgareeyey PIN!

HSR wuxuu weydiistay in go'aankan dib loo eego. Warbixinta dib u eegesta gudaha ee inta shil ee dhacay; waxay ahayd mid daran falalka maamulku, iyo kuwa kormeerayaashu; laakiinse ma bedelin kansal gareyntii PIN. Sababta tan loo sheegayna waxaa weeye qayb khaldan oo sharciga ah ayaa la isticmaalay. Dib u eegista Gudaha ayaa sheegtay in PIN uusan ahayn mid shaqeynaya sababtoo ah HSR waxay isticmaashay qaybta 58(1)(f) oo micnaheedu yahay xaqiisa uu ku doonan karo caawimaad meeshii uu ka isticmaali lahaa qaybta 70(1) oo micnaheedu yahay waxay ahayd waajibaadka loo shaqeeyuhu inuu aqbalo xaqaas.

Niyada sheekadaan waxaa weeye haddii aad ka murmeysid xaqaada aad ku doonaneysid caawimaada qof kale oo kasta [qaybta 58(1)(f)] waa inaad u

sheegtaa loo shaqeeyahaaga in waajibaadkooda inay u ogolaadaan qofku inuu ku caawiyo adiga oo laga helo qaybta 70(1)!

Ka sokow diidmada tooska ah ee HSR's PIN, natiijada  shemozzle ka  waxay ahayd in Sarkaalka taageerada HSR uu awooday inuu caawiyo xagga tababarida HSRs waxyaalaha ku saabsan kormeer sameynta, aadiga goobta shaqada iyo ka qaybqaadashada guddiyada ammaanka iyo caafimaadka markasta oo qof kasta oo ka mid ah HSRs uu codsaday caawimadiisa.

**Dib u eegista go'aamada**

aasaas ahaan, haddii uu kormeere uu sameeye go'aan waxaad weydiisan kartaa in dib loo eego go'aankaas haddii aad u maleynayso inuu khaldan yahay. Tiro go'aamo ah ayaa dib loo eegi karaa [qaybta 127] sida  DWGs, PINs (affirmed, amended or cancelled), Directions to Cease Work, hadal macquul ah oo daneynaya caafimaadka iyo ammaanka. Caddeynta in arimihii la daaweeyey. Kani ma aha liis wada dhan, sahal ahaan kuwa saameeya HSRs badidooda.

Haddii aad u maleynaysid in go'aankoodu khalad yahay waxaad weydiisan kartaa in dib loo eego. Waxaad heysataa 14 maalmood inaad codsigan soo xareyso. Waxaa jira foom khaas ah oo ay tahay inaad buuxisid. Qaybaha khuseeya ee Sharciga waa 127. 128, iyo 129. foomka waxaa laga helayaa WorkSafe, Ururuka shaqaalaha ama waxaad ka heli kartaa website kooda ah : http://www.worksafe.vic.gov.au

haddii natiijada dib u eegista gudaha waxaa suurtogal ah inaad arinta sii wadid. Tallaabada ku xigtaa waxay ku lug leedahay dalbashada Maxkamada Maamulka iyo Arimaha Madaniga ah ee Fiktooriya( Victorian Civil and Administrative Tribunal).

Guud ahaan waa feker fiican inaad caawimaad ka heshid Ururka shaqaalaha Sarkaalka Ammaanka & Caafimaadka  ama Sarkaalka Taageerada HSR haddii aad dooneysid in go'aamada in si toos ah dib loogu eego. Kaligaa ha sameynin, iyo xitaa marka nidaamka tooska ahi shaqeyn waayo sidaad dooneysid inuu sameeyo, the dib u eegista waxay caawin kartaa inay ka dhigto in waxyaaluhu u shaqeeyaan si ka fiican mustaqbalka, sida lagu sharxay Tusaalaha 11.

**Wax badan oo ku saabsan kormeerayaasha**

qaybta  9 aad ee Sharcigu wuxuu la xiriiraa kormeerayaasha iyo xoog ku fulinta . Kormeerayaashu waxay geli karaan shaqadii ay doonaan [qaybta 98]. haddii soo gelidoodu ay wax shaqo ah ku leedahay shaqo oo uu sameeyo xubnaha midkood ee DWG, HSR waa in la wargeliyaa ammaanshahooda [qaybta 102].  HSR wuxuu xaq u leeyahay inuu raaco kormeeraha inta uu kormeerka goobta shaqada sameynayo ee khuseeya xubin kasta oo ka mid ah DWG [qaybta 58 (1) (b)]. tan micnaheedu waxaa weeye in la wargeliyo HSR waxyaalaha ku saabsan kormeerka la soo jeediyey lagana fasaxo waajibaadka ay hayaan si uu uga qayb galo kormeerka. Hal si ah oo tan

looga gaari karo goobta xoolaha lagu qalo waa in la sameeyaa Rover ama la sameeyaa qof xoogsade ah oo gala boosta laynka HSR.

Haddii uu kormeere uu la hadlo xubnaha DWG midkood xubintu waxay heli kartaa inuu la joogo HSR wada hadal kasta oo noocan ah haddii uu shaqaaluhu doonayo inuu goob joog ahaado [qaybta 58(1)(d) & (e)]. Si arintan looga dhigo mid shaqeysa waa inay jiraan nidaamyo laysku raacay oo caddeynaya in HSR hore loo ogeysiiyey si ay u weydiin karaan xubinta DWG inay jeclaan lahaayeen in wakiilkoodu goob joog ahaado iyo in kale .

Marka kormeeruhu uu soo galo goobta shaqada isaga ama iyada waa inay siiyaan warbixin qoran oo ku saabsan soogelitaankooda. Haddii ay la xiriirto wax ka mid ah nuqulada DWG ee warbixinta waa in la siiyaa HSRs [qaybta 103]. marmarka qaarkood marka aan warbixinta la siin HSR waxaa laga yaabaa inay noqoto sababtu in uu kormeeruhu uusan ogeyn inay jiraan HSRs la doortay. Waa inuu jiraa liis shaqeynaya oo ah HSRs ee loogutalagalay DWG oo muujisan lana keeno marka la codsado [qaybta 71] si kormeerayaashu ay u awoodaan inay jeegareeyaan. Miyey jeegareeyeen?

Haddii uu jirey booqasho kormeere oo ku saabsan wax khuseeya DWG - gaaga, la xiriir WorkCover codsana in lagu siiyo nuqul. Haddii aysan ku siin sabab la'aan waa inaad u cabataa WorkSafe. Waxaad taas ku sameyn kartaa taleefanka wecitaankiisu bilaashka yahey ee 1800 136 089.

Marmarka qaarkood kormeerayaasha waxay uga tagaan nuqulada Warbixintooda ee HSRs maamulka oo aan u sii gudbin. Haddii ay saa tahay waxay ku jiraan khalad. Tan kala hadal maamulka, deji nidaam si aad u hubiso in warbixinta kormeer kastaa ee khuseeya xubnaha DWG in loo soo gudbiyo HSR. Tani waa fursad wakhti marka HSRs ay isu tegi lahaayeen si aan laydiin kala qaybin oo aan laysu kiin adeegsan. Waxaad weci kartaa Sarkaalka Taageerada ee Ururka shaqaalaha inuu kaa caawiyo tan haddii loo baahdo.

Haddii aad dareento inaysan warbixintu saxneyn ama aysan ku filneyn waxaad codsan kartaa in dib u eegis lagu sameeyo. Caawimo u doono Sarkaalka Taageerada.

**Ilaalinta HSRs**

Loo shaqeeye kastaa oo kala sooca HSR HSR (ama Ku xigeenka HSR) iyagoo fulinaya waxay xaq u leeyihiin waa dacweyn karaa [qaybta 76]. kala soocida waxaa ka mid ah casilida, anshax marinta ama eryida HSR ama ku hanjabedida inay sidaa sameeyaan.

Xaqiiq ahaan tani ma ilaalin doonto HSR sameeya waxa khaldan sida dhibida dadka ay wada shaqeeyaan isagoo u eegaya jinsiyada, dhalashada ama jinsiga, laakiinse waxay ka ilaalineysaa lagu kala sooco soo jeedintiisa waxyaalo uu saluugsan yahay oo ku saabsan caafimaadka iyo ammaanka oo dhab ah, kormeer sameynta, qorida PINs ama isticmaalida wax kale oo uu xaq u leeyahay HSR ahaan.

Waxaa sidoo kale sharci daro ah in la kala sooco shaqaale kasta oo soo jeediya wuxuu ku saluugsan yahay ammaanka iyo caafimaadka HSR ama kormeeraha [qaybta 76(2)(c) & (d)].

haddii loo shaqeeyaha lagu helo inuu dembi galay waxay la kulmayaan ganaaxyo, laakiinse waxaa sidoo kale laga yaabaa inay magdhow bixiyaan oo siiyaan qofka shaqaalaha ah ee la kala soocay [qaybta 78(a)]. haddii ay shaqada ka eryeen HSR shaqaalaha sidoo kale waa la soo celin karaa [qaybta 78(b)].

**ARREO**

Eraygan la soo gaabiyey micnihiisu waxaa weeye saraakiisha ururka shaqaaluhu ee lagu soo tababaray ammaanka iyo caafimaadku oo ay u idamtay Maxkamada Hoose inay galaan goobaha shaqada [section 83]. Xoghaya AMIEU, kalkaaliyaha Xoghaya, Sarkaalka Ammaanka & Caafimaadka iyo dhammaan qabanqaabiyayaasha waxay u idman yihiin inay galaan goob kasta oo shaqo halkaas oo hilib lagu sameeyo haddii aan ka shakino in Sharciga la jebiyey ama wax ka mid sharciga ammaanka iyo caafimaadka.

ARREO waxay awoodaa inay ku tiraahdo meeshii ay ka shakiyaan waxaa jira dhibaato ammaan iyo caafimaad [qaybta 87], laakiinse uma baahna inay u sheegaan ciddii soo wacday ama xubinta AMIEU qofkuu yahay. Markay soo galaan goobta shaqada waa inay la hadlaan HSRs kasta oo ay khuseyso.

ARREO waxay kormeeri kartaa wax kasta, waxay la tashan kartaa shaqaalaha oo ay soo jeedin karaa arimaha ammaan iyo caafimaad ee ay arkaan (ama ay wax ka maqleen) maamulka [qaybta 89]. ARREO ma joojin karto socoshada shaqada laakiinse waxay la tallin kartaa shaqaalaha iyo HSRs inay la tahay in mishiinka/socodka shaqada iwm la joojiyo.

Haddii aad leedahay goob shaqo oo aan lahayn HSRs oo aad dareemiyeyso in aad laguu cabsi geliyey si aad caawimaad u doonato si lagugu garan karo inaad adiga tahay, waxaad heli kartaa inuu Ururuka shaqaaluhu yimaado goobta shaqada adoo isticmaalaya xuquuqdayada ARREOs ahaan. Waxaa cad inay tani tahay waxa ugu faa'iidada badan haddii aad joogto mid ka mid ah goobaha shaqada halkaas oo lagugu yiri haddii aad ku biirto ama aad wacdo ururka shaqaalaha shaqadaada ayaad lumineysa.

ARREOs xaq uma laha HSRs laakiinse waxay noqon karaan kuwo caawimo badan haddii aadan lahayn HSRs oo uu loo shaqeeyahaagu uusan dooneynin inuu dhageysto shaqaalaha waxyaalaha ku saabsan ammaanka iyo caafimaadka.

**Wakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka muhiim ayey u yihiin hagaajinta goobaha shaqada**

Ha ilaawin in Wakiilada Ammaanka iyo Caafimaadka ay sameyn karaan waxyaalo badan si ay u hubiyaan inaad ku ammaan iyo caafimaad qabto shaqada:

- dhiirigeli waxbaqabadka xubnaha;
- kormeerida goobaha shaqada wax kasta oo ah khataraha ammaanka iyo caafimaadka iyo khatarta iyo baaritaanada wixii shilal ah, jirooyin ama dhaawacyo iyadoo lala tashanayo xubnaha;
- kala hadal oo la xali maamulka arin kasta oo ammaan iyo caafimaad;
- bixi PINs;
- tilmaan shaqo joojin xaaladaha ay jirto khatar soo fool leh;
- metel oo la tasho xubnaha waxyaalaha ku saabsan Guddiga Ammaanka iyo Caafimaadka;
- metel oo la tasho xubnaha sameynta nidaamyada siyaasadeed ee ammaanka iyo caafimaadka dhaammaantood/wax kasta oo ka mid ah;
- wax ka geyso dhammaan isbedelada lagu sameynayo goobta shaqada sida shaqada la sameynayo, wershada iyo waxyaalaha laga yaabo inay saameyn karaan caafimaadka, ammaanka iyo samafalka shaqaalaha aad metesho, iyo
- dib waxbixin u soo sii qof kasta ku saabsan arimaha ammaanka iyo caafimaadka.

Sidoo kale ku yeelashada xuquuqdan Sharciga Ammaanka iyo caafimaadka Shaqada, HSR waxay had iyo jeer leeyihiin xoogga xubnaha midoobay si ay iyagoo wada jira ay uga hadlaan arin. Shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin inay ka shaqeeyaan meel ammaan ah oo aan wax khatar ah u lahayn caafimaadkooda.

**Wada jira!**